

## Nadiifinta oogu dambeyso ee guriga

### Goobta qubeyska, saunada, iyo godka musqulaha

- Dhaqista dhulka, derbiyada, murayadaha, goobta saxarad, saxanka wajidhaqa iyo alwaaxda lagu fariisto saunada
- Tirtir ama masax dhammaan armaajootinka oo dhan gudohooda iyo korkooda

### Daaqadaha

- Meydh ama dhaq dhammaan dusha daaqadaha. Xilliga Jiilaalka daaqadaha gudaha dhaqidooda ayaa ku filan.

### Jikada

- Tirtir ama masax dhammaan armaajootinka oo dhan gudohooda iyo korkooda
- Meydh ama dhaq caagga qashinka
- Nadiifi foornada, saxamada foornada, birta foornada iyo shooladda ama makiinadda cunta kariska. Sidoo kale nadiifi dhinacyada iyo korka shooladda ama makiinadda cunta karinta.
- Dhalaali oo nadiifi talaajadda iyo qaboojiyaha. Sidoo kale talaajadda korkeeda.
- Nadiifi makiinadda cunta karinta korkeeda shabaqa qiiq qaadaha

### Qolalka jifka iyo qolalka kale ee guriga

- Tirtir ama masax dhammaan armaajootinka oo dhan gudohooda iyo korkooda
- Tirtir ama masax dhammaan darbiga iyo dhulka alwaaxyada isku haya korkooda
- Huufaree dhulka kuna tirtir ama ku masax maro aan qoyaan badan laheyn
- Tirtir ama masax albaabka laga soo galo iyo albaabka dhexe

Haddii markaad guureyso aadan sameyn nadaafadda oogu dambeyso ama aad u sameyso si aan wanaagsaneyn, waxaan kugu soo dallaceyanaa lacagtii lagu nadiifiyay.

Goobta qashinka la geeyo lama dhigi karo alaabta guriga ama kuraasta, sariiraha iyo miisaska. Degganaha guriga waa in uu daryeelaa sidii uu u geyn lahaa alaabta guriga iyo qalabka elektaroonigga ee uu iska tuurayo meeshii

loogu talagalay in la geeyo.

Waa in aad habsataa ugu dambayn in aysan alaab kaaga harin guriga, barxadda ama dibadda iyo bakhaarka.

**Pudasjärven Vuokratalot Oy**

Oikopolku 2 B 2, 93101 Pudasjärvi • Tal 050 4098 190 • [asuntotoimisto@pudasjarvi.fi](mailto:asuntotoimisto@pudasjarvi.fi) • [www.pudasjarvenvuokratalot.fi](http://www.pudasjarvenvuokratalot.fi)